




Tababarashadu waa fursado shaqo oo sanado badan ah halkas oo ardaygu ka bilaabo sahamin qoto dheer oo ku saabsan shaqo oo uu ku raadinayo shahaado iyo/ama digree jaamicadeed oo ah madadaas. Tababarashadu waa jagooyin lacag bixin ah oo inta badan ku bilaabma fasalka sedexaad ama afaraad ee dugsiga sare waxayna sii wadi karaan 1 ilaa 2 sano qalinjabinta ka dib. Tababarashadu waxay noqoneysaa shaqaale shirkadeed waxayna qaataan shaqo koorso la xiriirta inta ay weli ku jiraan dugsiga sare.



Sidee u shaqeysaa?

- Ardayda loo shaqaaleysiyo tababarayaal ahaan waxay qaataan oo keliya koorsooyinka looga baahan yahay qalin-jabinta dugsiga sare ee ay dhigtaan. Koorsada Tababarka Xirfada iyo Farsamada (CTE) waxay bedeshaa koorsooyinka xulashada waxayna u ogolaaneysaa ardayda inay shaqeeyaan inta lagu jiro maalinta dugsiga.
- Xirfadlayaashu waxay ka shaqeeyaan sidii loo baran lahaa kartida la xiriirta ama gaarista saacadaha looga baahan yahay shahaadooyinka.
- Heitaanka waxbarasho la xiriirta dariiqa xirfadeed ee ay rabaan (ha ahaato iyada oo loo marayo koorsooyinka isqorista ee iswaafaqsan/laba-geesoodka ah, ka bixinta kharashka waxbarashada, ama taageerada helitaanka shahaadada)
- Jadwalka dugsiga sare waxaa loo abaabulaa si ardaygu u shaqeeyo inta lagu jiro qayb ka mid ah maalinta dugsiga oo uu u qaato fasallada dugsiga sare.

Waxaa jira fursado tababar oo kala duwan oo la siiyo ardayda Degmada Dugsiga Cherry Creek. Fursad kastaa waxay leedahay nidaam codsi oo gaar ah iyo shuruudo u gaar ah si loo waafajiyoo baahida shirkada iyo ardayga. Ardaygu waa inuu buuxiyaa shuruudaha shaqaalaynta iyo u-qalmitaanka shaqada sida uu cadeynayo shirkada loo shaqeeyaha bixiya xirfadda.

Sida loo codsado:

1. Gudi shaqo oo CCSD ah yaa furi doona simistar kasta oo gu'ga-springka ah oo dhejiya tababarada la heli karo sanadka soo socda.
2. Ardaydu waxay buuxiyaan codsi guud waxaana ardayda qaar laga codsan doonaa inay wareysi la yeeshaan kooxda tababarka iyo shirkada. Xirfad kasta waxay leedahay shuruudo iyo habab kala duwan.
3. Hadii ardayda la doorto oo ay aqbalaan booska shaqo ee tababarka, waxaa lagu qori doonaa Seminar Tababarka. Waxay sidoo kale bilaabi doonaan hawsha shaqaalaynta iyo fuulitaanka shirkada loo-shaqeeynayo.



Dedicated to Excellence

Cherry Creek Schools

Barashada Shaqada oo Ku-saleysan - Tababbarka

Inta badan tababarrada waxay la jaan qaadayaan Barnaamijyada CTE ee degmada. Waa maxay dariiqooyinka?

- Maamulka Ganacsiga
- Farshaxanka Warbaahinta
- Teknolojiyada macluumaadka
- Injineernimada & Farsamada
- Sayniska Caafimaadka
- Sharciga, Badbaadada Dadweynaha, Asluubta & Amniga
- Martigelinta iyo Dalxiiska
- Adeegyada Bulshada
- Architecture iyo Dhismaha
- Warshadaha
- Gaadiidka, Qaybinta iyo Saadka
- Hogaanka Hawlaha Nasashada ee Bannaanka

Xirfadaha tababarka waxaa laga yaabaa inaan laga heli karin barnaamij kasta. Xirfadaha tababarka yaa isbeddelaya sannad ilaa sannad.

Barnaamijyada oo dhan laguma bixiyo dugsi kasta oo sare. La xiriir la-taliyaha dugsigaaga ama tixraac hagaha koorsada dugsiga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Dhamaan koorsooyinka lagu bixiyo Xarunta Hal-abuurka ee Cherry Creek waxay la jaan qaadayaan mid ka mid ah Barnaamijyada.

Wixii macluumaad dheeraad ah

La xiriir la-taliyaha dugsiga sare ee ardayga

La xiriir kooxda waxbarashada ku saleysan shaqada

Tara Bell, Maamulaha Shaqaalaha Duggiga Sare, tbell18@cherrycreekschools.org

Ashlin Montgomery, Wada-hawlgalayaasha Tababbarka

amontgomery12@cherrycreekschools.org

Margaret Krob, Kaaliyaha, mkrob@cherrycreekschools.org